



## Dugsiyada Cherry Creek

Heshiiska Badbaadada Ardayda Sayniska ee Dugsiga Dhexe

### Ujeedo

Saynisku waa fasalka shaybaarka oo ah in gacanta lagu hayo. Si kastaba ha ahaatee, hawlaha sayniska yaa laga yaabaa inay leeyihiin khataro suurtagal ah. Waxaan isticmaali doonaa qaar ka mid ah qalabka iyo xayawaanka oo laga yaabo inay khatar yihiin hadii aan si haboon loo farsamayn. Badbaadada fasalka sayniska waa qayb muhiim ah oo ka mid ah habka sayniska. Si loo hubiyo in isticmaalka qalabka ee fasalka badbaado ahaado ama sayf, liis sharci ah yaa la sameeyay waxaana loo yaqaan kunturaada Badbaadada Sayniska. Xeerarkan waa in la raaco. Tilmaamo badbaado oo dheeraad ah yaa la siin doonaa hawl kasta.

Arday saynis dhigta looma oggolaan doono inuu ka qaybqaato hawlaha sayniska ilaa heshiiskan ay saxeexaan ardayga iyo waalidka ama masuulka.

### Xeerarka Badbaadada (Safety)

1. Si xilkasnimo leh had iyo jeer u isticmaal gudaha qolka sayniska. Ciyaarta, kaftanka wax ku oolka ah, iyo maaweelada looma dulqaadan doono fasalka dhexdiisa.
2. Si taxaddar leh u raac dhamaan tilmaamaha qoran iyo kuwa afka ah. Weydii macalinkaaga su'aalo hadii aadan fahmin tilmaamaha.
3. Ha taaban wax qalab ah, sahay, xayawaan, ama qalab kale oo qolka sayniska yaala adiga oo aan fasax ka haysan macalinka.
4. Samee tijaabooyin laagu ogolaaday oo keliya. Ha samayn wax tijaabo ah marka macalinku ka maqan yahay qolka.
5. Weligaa ha cunin, cabin, xanjo ha ku ruugin qolka sayniska.
6. Gacmaha ka fogee wejiga, indhaha, iyo afka markaad isticmaalayso qalabka sayniska ama markaad ku shaqaynayso kiimikooyinka ama xayawaanka. Ku dhaq gacmahaaga saabuun iyo biyo ka hor inta aanad ka bixin qolka sayniska.
7. Xiro muraayadaha badbaadada ee lagu ogolyahay. Weligaa ha iska saarin muraayadaha ama muraayadaha badbaadada inta lagu jiro tijaabada. Sharcigan marwalba waa in la oofiyaa!
8. Ka dhig goobta shaqada iyo qolka sayniska mid nadiif ah. Keen kaliya tilmaamaha shaybaarkaaga, xaashida shaqada, iyo qalabka qoraalka goobta shaqada.
9. Nadiifi dhamaan goobaha shaqada iyo qalabka dhamaadka tijaabada. Ku soo celi dhamaan qalabka oo nadiifka oo si habsami leh u shaqaynaya kuna soo celi goobta kaydinta.
10. Raac tilmaamaha macalinkaaga si aad u tuurto wax kasta oo wasakh ah oo ka dhashay tijaabooyinka.
11. U soo sheeg shil kasta oo dhaca (dab, daatay, jab, iwm.), dhaawac (goyn, gubasho, iwm.), ama xaalad khatar ah (qalabka jaban, iwm.) isla markaaba macalinka.
12. Ka fiirso dhamaan kiimikooyinka lagu isticmaalo qolka sayniska inay khatar yihiin. Ha taaban ama urin wax kiimiko ah ilaa si gaar ah loogu farayo mooyee.
13. Si taxadar leh oo ixtiraam leh ula dhaqan dhamaan xayawaanka shaybaarka.
  - a. Furo qafisyada xayawaanka adoo ogolaansho haysta oo keliya
  - b. Waligaa ha taa taaban wax xayawaan ah marka macalinku qolka ka maqan yahay.
  - c. Xayawaanka ka bixin qolka sayniska.
  - d. Ha ku ciyaarin hana ula dhaqmin xayawaanka si adag.
  - e. Xayawaanka ka fogee wejiyada ardayda.
  - f. Xidho galoofyada marka aad xayawaanka qabanayso.



## Dugsiyada Cherry Creek

Heshiiska Badbaadada Ardayda Sayniska ee Dugsiga Dhexe

- g. Isla markiiba u sheeg macalinka wixii qaniinyo ama xagfin ah ee xayawaanka.
14. Had iyo jeer ku qaado mikroskoob labada gacmood. Hal Gacan ku qabo; gacanta kale hoosta uga qabo.
15. Ula dhaqan dhamaan shaybaarada la xafiday iyo kala qaybinta saadka si taxadar iyo ixtiraam leh.
- Ha ka saarin alaabta la xafiday ee qolka sayniska.
  - Isticmaal qalabka maqaarka, maqas, iyo qalabyada kale ee fiiqan oo kaliya sida lagu tilmaamay.
  - Waligaa ha u soo gooyn waxa la jarayo dhinacaaga - had iyo jeer ka jeedi jirkaaga.
  - U sheeg macalinka isla markaaba wixii dhaawac ah ee uu keeno qalabka fiiqan.
16. Weligaa ha furin armaajooyinka kaydinta, hana gelin qolka diyaarinta/kaydinta adoon fasax ka haysan macalinka.
17. Ha ka saarin kiimikooyinka, qalabka, agabka, iyo xayawaanka qolka sayniska iyada oo aan fasax laga helin macalinka.
18. Si taxadar leh u qaad dhamaan weelasha dhalada ah. Weligaa gacmahaaga oo qaawan ha ku qaadin weelka kulul ama jaban.
19. Isticmaal taxaddar aad u badan markaad isticmaaleyso taraq, digsiiga wax lagu shiilo, ama saxan kulul. Isticmaal wax yaabaha la shido marka lagu fasaxo oo kaliya. Waxba ha saarin olol ilaa si gaar ah loogu amro mooyaane. Ha ka tagin dabka oo shidan adigoo la joogin.
20. Si fiican u labbiso markaad shaybaadhka samaynayso. Timaha dhaadheer waa in dib loo xiraa, ha xuran dahab ka lulanaya, ha xiran dhar dabacsan. Xiro dharka loogu talagalay shaybaarka.
21. Baro meesha qalabka badbaadada yaalo iyo sida loo isticmaalo. Ogow meelaha laga baxo iyo waxa la sameeyo hadii ay dhacdo xaalad degdeg ah ama dab-damis.

### **HESHIISKA**

Aniga oo ah, \_\_\_\_\_ (magaca ardayga) waan akhriyay waana fahmay mid kasta oo ka mid ah xeerarka badbaadada ee kor ku xusan ee lagu sheegay heshiiskan. Waxaan aqbalay inaan raaco shuruudaha si aan u badbaadiyo naftayda, iyo nafta kuwa kale ee ku jira fasalka sayniska ama shaybaarka. Waxa kale oo aan aqbalay in aan mar walba raaco xeerarka guud ee ku haboon fasalka si looga fogaado shilalka iyo in la helo jawi waxbarasho oo amaan u ah qof kasta. Waxaan fahamsanahay in hadii aanan raacin dhamaan sharciyada iyo taxadarrada badbaadada, aan la ii ogolaan doonin inaan ka qaybqaato hawlaha sayniska.

### **Saxiixa Ardayga IYO Taariikhda**

Gacaliye Waalidka ama Masuulka:

Waxaan dareensanahay inaad tahay in lagu ogeysiyo dadaalka dugsiiga si uu u abuurto loona ilaaliyo jawi sayniska badbaado leh / jawi shaybaar. Fadlan akhri liiska xeerarka badbaadada. Ardayna looma ogolaan doono inuu qabto hawlo saynis ilaa heshiiskan ay saxeexaan ardayga iyo waalidka/masuulka oo uu fayl ku jiro macalinka. Saxiixaaga qandaraaskan wuxuu muujinayaa inaad akhriday Heshiiska Badbaadada Sayniska, dib ula eegtay ilmahaaga, oo aad ka warqabto fillaabooyinka la qaaday si loo hubiyo badbaadada wiilkaaga/gabartaada ee fasalka sayniska.

### **Saxeexa Waalidka/Masuulka IYO Taariikhda**



## Dugsiyada Cherry Creek

Heshiiska Badbaadada Ardayda Sayniska ee Dugsiiga Dhexe

---

### **Su'aalo muhiim ah:**

Ilmahaagu ma xirtaa muraayadaha indhaha? Haa ama Maya

Ilmahaagu ma kala garan kara faraaqa u dhexeeya midabada? Haa ama Maya

Ilmahaagu ma leeyahay wax xasaasiyad ah? Haa ama Maya

Hadii u leeyahay, fadlan qor: